

# Gudniinka xubinta taranka

**Gudniinka xubinta taranka waa mamnuuc Iswiidhan sida waafaqsan Sharciga Iswiidhan ee (SFS 1982:316).**

Qof kasta oo ku xadgubda sharcigan ayaa lagu xukumi karaa ilaa 10 sanno oo xadhig ah, xataa haddii gudniinka xubinta taranku uu ka dhaco banaanka Iswiidhan. Isku deyga iyo qabanqaabinta gudniinka xubinta taranka ayaa sidoo kale sharci darro ah, iyo sidoo kale qalqaalinta in cid kale lagu qalqaaliyo inay sameeyso gudniinka xubinta taranka. Waxa sharci darro ah in aan arinta la soo sheegin haddii aad ogahey in gudniinka xubinta taranka la sameynaayo. Cidey doontaba ha ahaato cida sameynaysa gudniinka xubinta taranka, ee waxa masuul ka ah waalidka gabadha inay ka hortagaan in gudniinka xubinta taranka loo sameeyo iyadoo Iswiidhan danbigaas lagu xukumi karo.

Sharciga (1982: 316) oo mamnuucaya gudniinka gabdhaha



Länsstyrelserna



Polisen

# Cawaaqibta

**Gudniinka xubinta taranka, iyadoo sidoo kale loo yaqaan gudniinka dumarka, ayaa ah xadgudub lagu waxyeelaynaayo ama lagu dhaawacaayo gabadh yar ama qof dumar ah xubnaheeda taranka ee banaanka. Gudniinka xubinta taranka waxa uu waxyeelo soo gaadhsiiyaa dhowr dhinac, iyadoo uu keeni karro dhibaatooyinka isla markaaba soo gaadha ama qaar gadaal nolosha kaga soo baxa:**

- Dhiig bax xiliga qaliinka la sameynaayo
- Infegshan
- Xanuun xubinta taranka
- Kaadida oo ku adkaata
- Dhibaato xiliga caadadu imaneyso
- Xanuun xiliga galmada, oo qofka gabadha iyo ninkaba soo gaadha
- Dhibaato ka hor istaagi karra qofka dumarka inay uur qaado
- Carqaladaha foosha
- Dhibaatooyinka dhimirka
- Dhimasho

# Noocyada gudniinka xubinta taranka gabdhaha

**Hay'ada Caafimaadka Aduunku (WHO) waxay gudniinka xubinta taranka ku qeexdey afar nooc.**


**Nooca 1:** Kintirka iyo/ama debnaha kore ayaa la gooyaa.

**Nooca 2:** Kintirka, debnaha hoose iyo marmarka qaar debnaha kore ayaa la jaraa.

**Nooca 3:** Kintirka, debnaha hoose iyo debnaha korre ayaa la jaraa iyadoo la isku tolo si loo daboolo godka/furitaanka siilka.

**Nooca 4:** Dhamaan qaliinada dhaawacaaya xubinta taranka, sida daldaloolinta.

Marmarka qaarkood ayaa gudniinka nooca “sunnaha” la sheegaa. Nooc kasta oo ka mid ah gudniinka xubinta taranku waa mamnuuc, xataa nooca loo yaqaan “sunaha”!





**Polisen**



Länstyrelserna

*Sharciga (1982: 316) oo mamnuucaya gudniinka gabdhaha  
Detta material är framtaget av Länstyrelsen Östergötland.*

*Sharciga (1982: 316) oo mamnuucaya gudniinka gabdhaha*

# INFORMATION OM KÖNSSTYMPNING

*Somaliska*



Sweden